

1

Akhri buug-yarahaaga codbixiyeyaasha si aad u barrato waxa ku qoran warqaddaada codbixinta.



2

Warqaddaada codbixinta, buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhyadaada.




3

Saxiix xagga dambe ee bakhshadda soo celinta ee warqaddaada codbixinta.



4

Soo celi warqaddaada codbixinta. Haddii ay tahay sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama boostada, wakhti hore codee!



5

Raad-raac warqaddaada codbixinta. Booqo kce.wiki/TrackMyBallot-SO ama isku qor helitaanka digniimaha warqadda codbixinta barta kce.wiki/BallotAlert. Kuwani waa hababka ugu wanaagsan ee lagu ogaado in warqaddaada codbixinta la tiriyay oo codkaaga la maqlay.



Sida loo

codeeyo!

Doorashada Gaarka ah ee Febraayo 2026

Degmada King Buug-yaraha Rasmiga ah ee Codbixiyeyaasha Deegaanka

sida ay codsatay Degmada Dugsiga Snoqualmie Valley Lr. 410

Isku qor si aad u hesho digniimaha warqadda codbixinta!

Hel qoraallo taleefan ama iimeelyo ah marka warqaddaada codbixinta la sii habeynaayo oo la tiriyo. Iska qor barta kce.wiki/TrackMyBallot-SO.



Is diiwaan geli si aad u codeyso



Oonleenka: Booqo VoteWA.gov si aad oonleenka iskaga diiwaan geliso oo aad u codeyso. Wakhtiga kama dambeysta ah ee is diiwaan gelinta oonleenka ee Doorashada Gaarka ah ee Febraayo waa Febraayo 2.



Boostada: Ka soo degso oo daabaco foomka diiwaan gelinta barta kce.wiki/VoterReg oo boostada ugu dir Doorashooyinka Degmada King: 919 SW Grady Way, Renton, WA 98057. Waa in la helaa ugu dambeyn Febraayo 2.



Shakhsi ahaan: Waxaad shakhsi ahaan iskaga diiwaan gelin kartaa xarunta guud ee Doorashooyinka Degmada King ilaa iyo Febraayo 10, Maalinta Doorashada. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan saacadaha iyo adeegyada waxaad ka heli kartaa barta kingcounty.gov/elections.

Nala soo xiriir si aad u hesho buug-yarahaan oo qaab kale ah.

Contact us to receive your voting materials in Chinese, Korean, Russian, Somali, Spanish, or Vietnamese.

如需獲取您的中文投票資訊，請與我們聯絡。

한국어로 투표 자료를 받으시려면 저희에게 연락하세요.

Свяжитесь с нами, чтобы получать материалы для голосования на русском.


Nala soo xiriir si aad u hesho agabyadaada codeynta oo ku qoran Af-Soomaali.

Comuníquese con nosotros para recibir sus materiales de votación en español.

Xin vui lòng liên lạc với Sở Bầu cử Quận King để nhận tài liệu bầu cử bằng tiếng Việt.



Baro wax dheeraad ah oo ku saabsan sanduuqyada lagu rido, Xarumaha Codbixinta, iyo in ka badan!



Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah?

Haddii warqaddaada codbixinta ay dhunto ama xumaato, waxaad daabacan kartaa warqad codbixin beddelaad ah adigoo jooga guriga, maktabadda, ama meel walba oo ku habboon.

Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka (OBMP) waxaa heli kara dhammaan codbixiyeyaasha diiwaan gashan. Waxaa loogu talagalay inuu u oggolaado codbixiyeyaasha naafada ah, gaar ahaan kuwa indhooleyaasha ah ama uu aragoodu hooseeyo, inay warqaddooda codbixinta si gaar ah u calaamadayaan.



Sida loo isticmaalo Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka

- Tag barta kingcounty.gov/elections/obmp.
- Macluumaadkaaga geli foomka.
- Ku calaamadee dookhyadaada warqadda codbixinta oonleenka oo ka dibna daabac warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay.

AMA

- Daabac warqaddaada codbixinta oo ka dibna gacanta ku calaamadee.

- Hubi in warqaddaada codbixinta si sax ah aad u calaamadaysay.
- Ku soo celi warqaddaada codbixinta sida caadiga ah, sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama adoo soo marsiinaaya boostada.

Lacagta boostada looma baahna haddii aad isticmaasho xaashida lifaaqa bakhshadda ee la socota marka aad daabacaysno warqaddaada codbixinta.



Haddii aad u baahan tahay caawinnaad dheeraad ah ama hab kale oo aad u dhiibato warqaddaada codbixinta, fadlan kala soo xiriir xafiiskeena taleefanka 206-296-VOTE (8683).




Yaa deeq ku bixiya ololeyaasha?

Eeg ku-deeqeyaasha dhaqaale ee musharaxiinta iyo cabbirrada sharciga ee gobolka iyo dowladda hoose:

Guddiga Kashifaadda Dadweynaha

www.pdc.wa.gov | Wicitaanka Lacag La'aanta 1-877-601-2828



Waxaan halkaan u joogaa in aan ku caawinno!

Shaqaalaha doorashooyinka ayaa kaa caawinno kara inaad is diiwaan geliso oo aad hesho warqad codbixin cusub ilaa iyo Maalinta Doorashada. Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah oo ma doonaysaa inaad si gaar ah u calaamadaysno warqaddaada codbixinta? Ka hel warqaddaada codbixinta oonleenka barta kingcounty.gov/elections/obmp si aad uga faa'iidayso Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka.

Warqaddaada codbixinta ayaa waxaa ku duuban macluumaad waxtar leh! Iska xaqiiji inaad lifaaqa warqaddaada codbixinta ka dhex eegto:

- shanta sanduuq ee lagu rido warqadda codbixinta ee kuugu dhow,
- halka aad ka heli karto caawinnaad shakhsi ahaanneed,
- sida loo daabaco warqaddaada codbixinta haddii taada kaa lunto ama waxyeello soo gaarto,
- sida loo soo celiyo warqaddaada codbixinta,
- iyo in ka badan!

206-296-VOTE (8683)
elections@kingcounty.gov
kingcounty.gov/elections

Baraheena Bulshada
[@kcelections](https://www.kingcounty.gov/elections)



Degmada Dugsiga Snoqualmie Valley Lr. 410

Soo Jeedinta Lr. 1	

Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama onleenka barta kingcounty.gov/elections.

Dib-U-Cusbooneysiinta Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Snoqualmie Valley Lr. 410 ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 896, ee khuseeya soo jeedinta canshuurta dib-u-cusbooneysiinta waxbarashada. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay soo rogtu canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda, iyadoo cusbooneysiinaysa canshuur wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada si loo maalgeliyo barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada ee aan si buuxda looga maalgelin Gobolka, oo ay ku jiraan u diyaargarowga xirfadda/kulliyadda, farshaxanka/muusigga, shaqaalaha, taageerada caafimaadka maskaxda, hawlaha ka baxsan manhajka, koorsooyinka ikhtiyaariga ah, nafaqada, ammaanka:

Sannadka Ururinta	Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/\$1,000 Qiimaha la qiimeeyay	Caddadka Canshuurta
2027	\$1.55	\$27,320,000
2028	\$1.55	\$28,686,000
2029	\$1.55	\$30,120,000
2030	\$1.55	\$31,626,000

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 896. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

Haa

Maya

 Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))

Bayaanka lagu taageerayo

Amanda Frame, Elizabeth Beckmann, Kyle Granderson (425) 466-3733

Dib-u-cusbooneysiinta Canshuurta Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada (EP&O) waxay bixisaa maalgelinta maxalliga ah ee muhiimka ah ee barnaamijyada iyo adeegyada taageeraya barashada iyo wanaagga ardayda kuwaas oo uusan si buuxda u maalgelin Gobolka Washington. Tani waa canshuur beddelaysa tii hore, ma aha canshuur cusub.

Maalgelinta canshuurtu waxay ilaalisaa waxbarasho tayo sare leh, fasallo cabbirkooda habboon yahay, iyo fursado waxbarasho oo kala duwan, oo ay ku jiraan farshaxanka, muusikada, luqadaha caalamiga ah, koorsooyin horumarsan, waxbarashada xirfadeed iyo farsamada, ciyaaraha, iyo hawlaha dheeraadka ah ee ardayda kuwaasoo ka caawiya ardayda inay kobcaan.

Canshuurtaan sidoo kale waxay taageertaa caafimaadka, ammaanka, iyo wanaagga shucuur-bulsheed ee ardayda iyadoo maalgelisa la-taliyeyaal, kalkaaliyeyaal caafimaad, adeegyada caafimaadka dhaqanka, iyo shaqaalaha ammaanka. Jagooyinkaan waxay muhiim u yihiin abuurista deegaan waxbarasho oo ammaan ah oo taageero leh.

Lacagaha canshuurta maxalliga ah waxay ka kooban yihiin ku dhawwaad shan meelood meel miisaaniyadda hawlgalka ee Degmada. Haddii aan dib loo cusbooneysiin, barnaamijyada iyo adeegyada qiimaha leh ee bulshadeennu ku tiirsan tahay ayaa khatar ku jiri doona. Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Snoqualmie Valley si wadajir ah ayay u taageeraan canshuurtaan taas oo qayb ka ah diiradda ay saarayaan waxbarasho heer sare ah, fursad, iyo helitaanka ardayda. Ku codeynta *Haa* wuxuu dib-u-cusbooneysiinayaa ballanqaadkeenna wadajirka ah ee diyaarinta arday kasta oo Snoqualmie Valley ah inay guuleystaan oo ay doortaan mustaqbalkooda.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Natiijooyinka imtixaannada gobolka waa tilmaamo aan dhammaystirnayn, maadaama ardaydu doortaan waddooyin kale ama ay ka baxaan imtixaannada. SVSD waxay cabbirtaa u diyaargarowga iyada oo adeegsanaysa natiijooyin: 96% heerka qalin-jebinta wakhtigeeda, iyadoo 80% ay ku biiraan barnaamijyada jaamacadaha ama barnaamijyada xirfadeed, taas oo aad ugu sareysa celceliska gobolka. Kordhinta canshuuraha waxaa ugu horreyn kaxeeya sicir-bararka iyo shuruudaha gobolka ee aan la maalgelin. Sicir-bararka tan iyo 2023 wuxuu ka badan yahay 20%, halka maalgelinta gobolka aysan la jaan qaadin. SVSD horrey ayay u jartay \$4 milyan si ay u qaaddo qaar ka mid ah saameynta. Ku codee Haa.

Doorashooyinka Degmada King looma oggola inay wax ka beddelaan bayaannada, mana qaadaan mas’uuliyadda qoraallada ku jira.

Bayaanka Sharaxaadda

Ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1 waxay Degmada Dugsiga Snoqualmie Valley u oggolaan doontaa inay dib-u-cusbooneysiiso canshuurta hadda jirta ee barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada taas oo wakhtigeedu dhammaanayso maalinta ugu dambeysa sannadka 2026. Canshuurtaan dib-u-cusbooneysiinta ah waxay sii wadi doontaa maalgelinta barnaamijyada waxbarashada ee muhiimka ah, hawlaha iyo hawlgallada aan si buuxda looga maalgelin Gobolka Washington. Kuwaas waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn: Waxbarashada Shaqada iyo Farsamada (CTE); joogtaynta tirada fasallada oo hooseeya; helitaanka ballaaran ee Koorsooyinka Meelaynta Sare (AP), muusigga, iyo fasallada farshaxanka; ammaanka iyo amniga ardayda; khabiirrada xisaabta iyo akhriska; agabyada, sahayda, iyo kharashaadka hawlgalka sida adeegyada tamarta iyo caymiska; ciyaaraha, naadiyada, iyo fursadaha kale ee ka baxsan manhajka; la-taliyeyaasha dugsiga, kalkaaliyeyaasha caafimaadka, iyo khabiirrada caafimaadka maskaxda; adeegyada taageerada habdhaqanka; iyo tababarka shaqaalaha iyo manhajka. Macluumaad dheeraad ah ayaa ku xusan webseedka Degmada barta svsd410.org.

Canshuurta dib-u-cusbooneysiinta ee afarta sanno ah ee la soo jeediyay ayaa oggolaanaysa ururinta canshuuraha si ay u bixiso ilaa iyo \$27,320,000 sannadka 2027, \$28,686,000 sannadka 2028, \$30,120,000 sannadka 2029, iyo \$31,626,000 sannadka 2030. Heerka canshuurta ee loo baahan yahay inuu soo saaro caddadyadaan ayaa lagu qiyaasay inuu yahay \$1.55 halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay. Ka dhaafitaannada canshuuraha ayay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha. Wixii macluumaad oo dheeraad ah la xiriiir Waaxda Qiimeynta Degmada King lambarka (206) 296-3920.

Bayaanka looga soo horjeedo

Kelly Dillingham, Robyn Balcom, James Keeffe SVSDforstudents@outlook.com

Warbixinta OSPI SVSD waxay muujinaysaa in keliya 52% ardaydu ay diyaar u yihiin waxbarashada heerka kulliyadda ee xisaabta iyo 45% sayniska. Kuwani waa darajoyyin liita – Fs! Canshuuraha ay maalgeliyaan dadweynaha ee dheeraadka ah ma hagaajin doonaan guusha ardayda, ama mar hore hagaajin lahaayeen. Sidaa darteed, codkaaga canshuurahaan waa inuu ahaadaa maya.

Inkastoo loogu yeero "canshuuraha dib-u-cusbooneysiinta", soo jeedintaan waxay leedahay koror weyn. Canshuurta EP&O ee la soo jeediyay 2027 waxay 33% ka sareysaa tii 2023. Dhanka kale, tirada ardayda degmada ayaa yaraatay tan iyo 2022. Intaa waxaa dheer, maalgelinta gobolka ayaa si weyn u kordhay tan iyo canshuurihii hore. HB1664 waxay kordhisay qoondeynta shaqaalaha sida kalkaaliyeyaasha caafimaadka iyo la-taliyeyaasha SB5263-na waxay kordhisay maalgelinta waxbarashada gaarka ah. Maalgelinta federaalka iyo gobolka ee SVSD ayaa ka kordhay \$95M (2022) ilaa iyo \$115M (2025).

Afartii sanno ee la soo dhaafay, dakhliga degmada ee ardaygiiba ayaa ka kordhay \$15,900 ilaa iyo \$19,400 – koror 22% ah. Ma hagaajiyay guusha ardayda kororkaas? Maya, sida ku cad warbixinta OSPI.

Laba qodob oo cusub oo la soo jeediyay oo ku jira miisaaniyadda EP&O waa kharashaadka maareeyeyaasha dugsiga hoose iyo canshuurta iibka – waxyaabahaan waxay isticmaali doonaan in ka badan \$1 milyan sannadkii waa inay ku jiraan miisaaniyadda guud. Ku codeynta maya ee canshuurahaan ma aha mid ka soo horjeeda waxbarashada. Waa taageerada xisaabtanka iyo u codeynta ee isticmaalka caqliga ku salaysan ee lacagaha dadweynaha.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Codbixiyeyaashu waxay mudan yihiin hufnaan dheeraad ah oo ku saabsan sida lacagta canshuurta dheeraadka ah loo isticmaalo. Maxaa canshuuraha, adeegyada aasaasiga ah, iyo caymiska loogu bixiyaa canshuuraha la soo rogay? Tani waxay keenaysaa su'aasha ah—maxaa kharashaadkan looga bixin la'yahay miisaaniyadda guud ee degmada, oo ah \$115,000,000 oo ka imaanaya maalgelinta federaalka iyo tan gobolka? Kharashaadkan waxba kama taraan barashada ardayda ama fayoaqabka ardayda, taas oo ah sababta degmada ay u sheegtay marka ay ka codsanayso canshuur-bixiyeyaasha lacag “dheeraad ah”. Deganyaasha mas’uulka ah waxay marka hore bixiyaan canshuuraha, adeegyada aasaasiga ah, iyo caymiska ka hor inta aysan iibsan waxyaabaha ikhtiyaariga ah; sidaas oo kale ayay tahay in Degmada Dugsigu sameyso. Ku codee Maya!

Degmada Dugsiga Snoqualmie Valley Lr. 410

Soo Jeedinta Lr. 2	

Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama onleenka barta kingcounty.gov/elections.

Dib-U-Cusbooneysiinta Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Teknolojiyada

Guddiga Agaasimeyaasha ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 897, ee khuseeya canshuurta dib-u-cusbooneysiinta ee taageereysa teknolojiyada ku aaddan ardayda Snoqualmie Valley. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay soo rogtu canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda, dib-u-cusbooneysiinta canshuur wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada, iyo inay bixiso kharashaadka teknolojiyada ee aan Gobolku maalgelin, sida nidaamyada shabakadda, aaladaha, softiweerka, tababarka iyo taageerada:

Sannadka Ururinta	Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/\$1,000 Qiimaha la qiimeeyay	Caddadka Canshuurta
2027	\$0.56	\$9,848,000
2028	\$0.55	\$10,094,200
2029	\$0.53	\$10,346,555
2030	\$0.52	\$10,605,219

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 897. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

Haa

Maya

 Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))

Bayaanka lagu taageerayo

Amanda Frame, Elizabeth Beckmann, Kyle Granderson (425) 466-3733

Dib-u-cusbooneysiinta Canshuurta Teknolojiyada waxay xaqiijinaysaa in dhammaan ardayda Snoqualmie Valley ay si siman u helaan qalabka canshuurasho ee casriga ah. Tani waa canshuur beddel ah, ma aha canshuur cusub, taasoo maalgelisa qalabka ardayda, teknolojiyada fasalka, softiweerka, shabakadaha, iyo kaabayaasha lagama maarmaanka u ah waxbarashada waxtarka leh.

Maalgelinta canshuurta waxay taageertaa tababarka macallimiinta iyo taageerada waxbaridda, ka caawisa macallimiinta inay teknolojiyada u isticmaalaan si ay u horumariyaan natiijooyinka ardayda.

Teknolojiyada la isku halayn karo waxay ka caawisaa ardayda inay buuxiyaan heerarka waxbarasho ee gobolka, horumariyaan xirfadaha dhijitaalka ah ee muhiimka ah, waxayna tartan la galaan degmooyinka deriska la ah.

Haddii aysan jirin canshuurtaan, degmada ma awoodi doonto inay sii waddo helitaanka teknolojiyada hadda jirta, taageerada, ama hal-abuurka waxbarashada, taasoo xaddidaysa fursadaha waxbarasho ee ardayda. Ku codeynta *Haa* wuxuu keena qalab, helitaan, iyo xirfadaha arday kasta u baahan yahay si uu ugu guuleysto dugsiga iyo wixii ka dambeeya.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Isbarbardhigga heerarka canshuuraha oo keliya wuxuu iska indha tiraa xaqiiqooyin muhiim ah. Degmooyinka waaweyn waxay kharashaadka ku qaybiyaan hanti ganacsi oo ballaaran; SVSD sidaas ma samayn karto. Canshuuraha isku-dhafan waxay soo ururin doonaan \$5,323 arday kasta, taas oo ka yar Issaquah (\$6,200), Lake Washington (\$5,865), iyo Riverview (\$5,691), iyada oo la bixinayo waxbarasho la mid ah, taas oo muujinaysa maamul mas’uul ah. Canshuurta Teknolojiyada waxay sii wadaa dayactirka qalabka/ shabakadaha, waxayna kor u qaaddaa ammaanka dhismeyaasha, amniga internetka, iyo tababarada uusan gobolka maalgelin. Tani waxay xaqiijinaysaa helitaan iyo xirfado dhigitaal ah oo u diyaariya mustaqbalka. Ku Codee Haa ee ku aaddan Teknolojiyada.

Doorashooyinka Degmada King looma oggola inay wax ka beddelaan bayaannada, mana qaadaan mas’uuliyadda qoraallada ku jira.

Bayaanka Sharaxaadda

Ansixinta Soo Jeedinta Lr. 2 waxay Degmada Dugsiga Snoqualmie Valley u oggolaan doontaa inay dib-u-cusbooneysiiso canshuurta hadda jirta ee teknolojiyada taas oo wakhtigeedu dhammaanayso maalinta ugu dambeysa sannadka 2026. Canshuurtaan dib-u-cusbooneysiinta ah waxay sii wadi doontaa maalgelinta horumarinnada, casriyaynta, iyo ballaarinta nidaamyada teknolojiyada, iyadoo la bixinayo tababar iyo taageero teknolojiyadeed ee ardayda iyo shaqaalaha, iyo hubinta in dhammaan ardaydu ay helaan marin siman oo ay ku helaan teknolojiyada loo baahan yahay si loogu diyaariyo shaqooyinka mustaqbalka. Tan waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn: (1) iibsashada, rakibidda, iyo hirgelinta nidaamyada shabakadda la casriyeeyay, qalabka teknolojiyada waxbaridda, kaabayaasha, iyo xarumaha; (2) ilaalinta wareegyada beddelka ah ee qalabyada ardayda iyo shaqaalaha, softiweerka, qalabka, iyo nidaamyada isgaarsiinta iyo horumarinta nidaamyada amniga internetka iyo ammaanka; iyo (3) bixinta tababar la xiriira ardayda iyo shaqaalaha si loo taageero isticmaalka waxtarka leh ee teknolojiyada (muwaadinnimada dhijitaalka ah), kaabayaasha, nidaamyada, iyo xarumaha. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa webseedka Degmada barta svsd410.org.

Canshuurta dib-u-cusbooneysiinta ee afarta sanno ah ee la soo jeediyay ayaa oggolaanaysa ururinta canshuuraha si ay u bixiso \$9,848,000 sannadka 2027, \$10,094,200 sannadka 2028, \$10,346,555 sannadka 2029, iyo \$10,605,219 sannadka 2030. Heerarka canshuurta ee halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay ee loo baahan yahay inuu soo saaro caddadyadaan canshuurta ayaa lagu qiyaasay inay tahay \$0.56 sannadka 2027, \$0.55 sannadka 2028, \$0.53 sannadka 2029, iyo \$0.52 sannadka 2030. Ka dhaafitaannada canshuuraha ayay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha. Wixii macluumaad oo dheeraad ah la xiriir Waaxda Qiimeynta Degmada King lambarka (206) 296-3920.

Bayaanka looga soo horjeedo

Kelly Dillingham, James Keeffe SVSDforstudents@outlook.com

Boqolkiiba lixdan canshuuraha hantida waxaa loo isticmaalaa waxbarashada. Sannadkii 2018, gobolka ayaa ku daray qayb labaad oo dugsiga (McCleary) lacagaha canshuurta hantida, si loo yareeyo ku tiirsanaanta canshuuraha loogana dhigo maalgelinta dugsiyada mid caddaalad ah. Kadib isbeddelkaan, canshuuraha ayaa hoos u dhacay celcelis ahaan laga bilaabo 17% ilaa iyo 12% dakhliyada dugsiga. Hadda SVSD waxaa lagu maalgeliyaa 20% canshuuraha – tani waa mid aan macquul u ahayn adeegyada loogu talagalay in lagu bixiyo canshuuraha. Sharci ahaan, canshuuraha looma isticmaali karo waxbarashada aasaasiga ah, keliya waxa loogu tala galay waxyaabo gaar ah oo aan maalgelinta gobolku daboolin.

Codbixiyeyaashu waa inay ogaadaan – Bogga canshuurta ee SVSD ayaa muujinaya inay ururiyaan lacag ka yar arday kasta marka loo eego degmooyinka deriska la ah. Si kastaba ha ahaatee, tani waa mid marin habaabin ah – Bogga internetka ee canshuurta degmada Issaquah wuxuu muujinayaa in heerka canshuurtooda uu ka hooseeyo SVSD. Mulkiileyaasha guryaha ee SVSD waxay horrey u bixiyaan canshuuro dugsyiheed oo maxalli ah oo ka badan halkii kun ee qiimaha guriga ee la qiimeeyay marka loo eego mulkiileyaasha guryaha degmada Issaquah (heerarka 2025 - SVSD \$3.25, ISD \$3.08, LWSD \$2.43).

Canshuurta teknolojiyada ee 2027 ee la soo jeediyay waa 22.5% oo ka badan tii 2023. Kororkaan ayaa ka sareeya wixii loo baahnaa si loola jaan qaado sicir-bararka.

SVSD waa inay dib u qiimeeyaan miisaaniyaddooda si ay u go'aamiyaaan lacag macquul ah oo laga codsan karo codbixiyeyaddooda si ay u baahnaanta siino baahiyaha ardayda ee kor u qaada barashada marka loo eego ajendayaasha kale. Ku Codee maya ku aaddan kordhin kale oo weyn oo ah kharash aan caddeyn lahayn ah.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Ku dhawwaad kala bar maalgelintaan waxay ku baxaysaa macallimiinta iyo shaqaalaha, halkii ay ka tagi lahayd ardayda ama qalabka. Miisaaniyadda canshuurta ee 2027, cusbooneysiinta qalabka waxay ka dhigan tahay keliya 18% kharashaadka, softiweerka iyo isku xirka 36%, halka shaqaalaha iyo horumarinta xirfadeed ay yihiin 46%; tani waa isbeddel weyn marka loo eego miisaaniyadda 2026 oo 35% loo qoondeeyay qalabka. Ma u baahanahay inaan ku darno tababarre teknolojiyadeed iyo AI ah oo saddexaad, iyadoo dhibcaha aasaasiga ah ee xisaabta iyo sayniska ay hoos u dhacayaan?

Bulshadu waxay taageertaa ardaydeenna iyo baahiyhooda, ee ma aha “rabitaanka” degmada. Ku Codee maya!